

Subject Line: OHSU K-12 Diiwaangelinta Baaritaanka COVID-19 way FURANTAHAY

Ardayda iyo qoysaska qaaliga ah ee PPS K-12,

PPS waxay iskaashi la samaynaysaa OHSU si ay ardayda u siiso baaritan COVID-19 todobaadle ah oo bilaash ah. Ka qaybqaadashada barnaamijkan gabi ahaanba waa ikhtiyaari laakiin waa dhiirigelin. Ardayda PPS way ka qayb qaadan karaan barnaamijka iyada oo aan loo eegin diiwaanka tallaalka. Ardayda ka qaybqaadanaysa waxay soo gudbin doonaan sambalka candhuufta ee tuubooyinka baritaanada ee horay loo sii calaamadiyay dugsigooda [maalin loo goondeeyay](#) toddobaad kasta, iyada oo aan loo eegin haddii ay leeyihiin astaamo. **Dugsiyada waxay bilaabi doonaan ururinta sambalada candhuufta laga bilaabo Sebtembar 27 ila 29.**

Maxaa cusub?

- **Diiwaangelinta:** Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay bilaabi karaan diiwaan gelinta ardaydooda iyagoo maraya [OHSU Websaydhkeeda CUSUB](#). Haddii aadan awoodin inaad isdiiwaangeliso sabab kastaba, fadlan ka wac Taageerada OHSU (503) 418-8500.
- **Tuubooyinka Baaritaanka:** Tuubooyin baaritaan ah cusub oo horay loo sii calaamadeeyay oo leh koodh la iskaan gareen karo ayaa si toos ah loogu soo diri doonaa ciwaankaaga boostada waana inay ku yimaadaan usbuuc isdiiwaangelinta gudahooda. **Qalabka baaritaanka ee sannadkii hore lama isticmaali karo, markaa fadlan iska tuur.**
- **Sambalka Candhuufta:** Sambalka candhuufta waxa la qaadi karaa habeenka ka horreeya ama subaxda maalinta baaritaanka dugsigaaga. Fadlan isticmaal [wargadan](#) si aad u barato maalinta la keenayo sambalka candhuufta ee ardaygaaga.
- **Natijoooyinka Baaritaanka:** Waxaad heli doontaa iimayl kuu sheegaya inaad gasho websaydka ee www.labfinder.com/ohsu si aad u aragto natijoooyinka marka la helo.
- **Meelo dheeraad ah la dhigi karo:** Haddii ay ku dhafto maalinta baaritaankaaga toddobaadlaha ah, OHSU waxay ku dartay 3 goobood oo la dhigo karo agagaarka aagga ee Portland.
 - Doernbecher Child Development Rehabilitation Center - 707 S Gaines Street, Portland, OR 97239
 - Primary Care Clinic at Gabriel Park - 4411 S Vermont Street, Portland, OR 97219
 - Richmond Family Health Center - 3930 SE Division Street, Portland, OR 97202

Maxaa isku mid ahaanayo?

- Ma jiro wax kharash ah oo ay qoysaska kaga qayb qaadanayaan barnaamijka Baaritaanka COVID-19 ee OHSU.
- OHSU waxay isticmaashaa baaritaanka molecular [PCR](#) oo sax ah.

- Ardayda waxay keeni doonaan sambalka candhuufta dugsigga maalinta baaritaanka loo qoondeeyey.
- Kalkaaliyaasha OHSU waxay wici doonaan waalidiinta/masuulka ardayda laga helay natiijo togan ama baaritaankooda aan natiijo ka soo bixin oo cadaaynayso fayraska SARS-CoV-2 ee sababa COVID-19.

Booqo websaydka ee Barnaamijka Baaritaanka OHSU ee K-12 halkan

<http://www.ohsu.edu/k12testing>, kala xiriir kooxda taageerada OHSU halkan

k12covidtesting@ohsu.edu, ama wac (503) 418-8500 wixii macluumaad dheeraad ah.

Jey Buno

Madaxa Ku-meel-gaarka ah ee Adeegyada Taageerada Ardayga

Dugsiyada Dadweynaha Portland